Maxamed Xirsi Guuleed

Fatwadii la soo caddeeyey

2009/03/05 - 2009/02/06

Waa qoraal metelaad ah oo ka turjumaya fahanka qoraaga ee isbedellada siyaasadeed ee hadda taagan. Magacyada la xusayo badankoodu waa metelaad.

NUXURKA QORAALKA:

"fikrad asalkeedu shirqool ahaa, ayaa dadkii lagu shirqoolayey loogu eekaysiin karaa maslaxaddooda. Markaas ayey iyagu dhaqangelinteeda ka shaqayn karaan ayagoo u qaba in ay maslaxaddoodu ku jirto" Qoraaga

Fatwadii la soo caddeeyey

Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Ilaahaybaa mahad iska leh, Naxariis iyo nabadgelyo ha u sugnaato Nebi Muxamed.

Fatwo ayaa soo baxday! Fatwo kale ayaa soo baxday! Fatwo kale ayaa haddana soo baxday! . Waxa ereyadaas oo lagu dhawaaqayo maqlay Maxamed-amiin.
Debedda ayuu uuga soo baxay meeshii uu ku jiray. Waxa uu kursi dhigtay meel bannaan oo aan ka fogayn aqalkii uu ka soo baxay. Wuxu doonayey bal in uu ka bogto warkan dadku isugu bushaaraynayaan. Labadii isa salaantaaba waxa ay isu sheegayeen in fatwo ama fatwooyin soo baxeen. Dad badan ayaa ku soo leexanayey Maxamed-amiin si ay ugala sheekaystaan bal sida uu u arko fatwooyinkan faraha badan ee soo baxay. Wuxu ahaa nin hore loogu bartay mawaaqif iyo male-wanaagsan. Sidaas darteed waxa lagu soo ururay meeshii uu fadhiyey.

Dadka isu soo ururay waxa ay ka midaysnaayeen hal ujeedo oo ah; in dhibaatada umaddan daashatay ay mar uun dhammaato. Laakiin waxa ay ku kala duwanaayeen waxyaalo fara badan. Qodobkaas ay ka midaysnaayeen ayaa keenay in ay wada xiiseeyaan fatwooyinka culimada ka soo baxay. Laakiin arrimaha ay ku kala duwanaayeen ayaa ka dhigayey qaar xaglo kala duwan ka fiiriya fatwooyinka. Fatwooyinka qudhoodu ma ahayn kuwo ku saacidaya dadka in ay sawir waadix ah helaan. Muddo kooban oo bilo gudahood ah ayaa oodda laga soo qaaday mawjado fatwooyin ah oo mararka qaarkood is burinaya. Waxa la moodaa in ay ahaayeen ka gaadhsiis.

Dadkii ku soo ururay Maxamed-amiin waxa ay ka sheekeeyeen fatwooyinka soo baxay iyo siyaalaha ay u fahmeen. Waxa ay xuseen fatwooyin ay ka mid ahaayeen:

- ”Dadka in la iska gaalaysiiyo ma aha. Taasi waa dhaqankii khawaarijta”: Guddiga culimada
- “Waa ay gaaloobayaan, dadka gaalo ugu kaalmeeya la dagaalanka muslimiinta”: Guddiga culimada
- “Dawlad lalama wadaagi karo nimankii gaalada wadanka soo geliyey ilaa ay toobad keenaan , waayo? Kuwaasi waa ay riddoobeen”: Guddiga culimada
- “Waa waajib diini ah in dawladda la taageero”: Guddiga culimada
- “Gobollada ay ka jiraan maamullo ay dhisteen dadka deegaanku, waa xaaraan in lagala wareego”: Guddiga culimada
- “Dawladdu distoorka ha ku waafajiso diinta islaamka muddo 90 cisho ah”: guddiga culimada iyo culimo shirtay
- “Ciidamada gaalada ah ee dalka jooga, ha lagaga bixiyo dalka muddo 120 cisho ah, kuwo kalena yaanan la keenin”: Guddiga culimada iyo culimo shirtay.

Markii ay dadkii dhammaysteen hadalkoodii ayey u jeesteen dhinaca Maxamed-amiin. Waxa ay waydiiyeen bal in uu ka faalloodo fatwooyinkan iyo waxa ku xigi kara. Markaas ayuu Maxamed-amiin u soo banbaxay faalladiisa oo uu dadkii dhinac kale wax ka tustay.

MAXAMED-AMIIN: Adeerayaal anigu fatwooyinkan nuxurka ay xambaarsanyihiin hore ayaan u hayey, waxaanan u arkaa “**fatwooyin la soo caddeeyey”**. “ Waa **fatwooyin la soo**

caddeeyey oo markii hore si kale ahaa”. Fatwooyinka ku xigi doonana waan sii qiyaasi karaa boqolkiiba 90.

DADKII: Maxaad uga jeeddaa fatwooyin la soo caddeeyey?
MAXAMED-AMIIN: waa su´aal fiicane, si aad u fahantaan sharraxayga, waxan u baahanahay qof dhaqaale-yahan ah. Markaa horta ma idinku jiraa qof ku takhasusay cilmiga dhaqaalaha?

Dadkii waa ay is fiirfiiriyeen oo waxa ay iska dhex waayeen qof dhaqaale-yahan ah. Markaas ayey yidhaahdeen; Maya, naguma jiro qof ku takhasusay cilmiga dhaqaalaha.

MAXAMED-AMIIN: Haddii la raadiyo, ma laga soo heli karaa meelahan qof ku takhasusay cilmiga dhaqaalaha?

DADKII: Haa, waa la soo heli karaa.

MAXAMED-AMIIN: Haddaba ha la inoogu yeedho, qof dhaqaalaha ku takhasusay.
Intaas aynu sugayno dhaqaale-yahankana, waxa aan idiin sii sheegayaa fatwada soo bixi doonta marka ay dhammaato muddadii ay culimada shirtay u qabatay bixitaanka ciidamada shisheeye iyo bedelaadda distoorka imbigaati: *Horta distoor wax weyn laga bedelayaa ma jiro, ciidamo baxayaana ma jiraane waabay sii kordhayaan muddadaas. Maxaa yeelay dadka laga codsaday in ay arrimahaas wax ka bedelaan, awoodeedii ma laha. Teeda kale waxaabay wax ku yihiin labadaas. Laakiin culimadu waxa ay u aqoonsadeen dawlad. Marka ay muddadu dhamaato ee ay arrimihii waxba ka qaban waydana, waxa ay culimadaasi odhan doonaan, bal aanu kitaabka u eegnee na suga. Markaa waxa ay soo saari doonaan fatwooyin nuxurkoodu yahay:*

- Dawladda waa ay ku qaldantahay ciidamada shisheeye ee dalka u jooga laakiin lagulama dagaallami karo qodobkaas, maxaa yeelay? Dembi ayey dawladdu gashay laakiin ma aanay gaaloobin. Haddii aanay gaaloobinna lalama dagaallami karo.
- Dawladda waxa ugu sarreeya amiirka, amiirkuna waa wadaad. Dadkuna amiirkooda ayey ku dabafayshanyihiin. Markaa in lala dagaallamaa ma bannaana ilaa inta uu salaadda oogayo.

Isaga oo Maxamed-amiin ku dhex jira sida ay u eegaan karaan fatwooyinka la sugayo ayaa la keenay nin da´diisu arbaciinka kor u dhaaftay oo cilmiga dhaqaalaha ku soo bartay waddamo kala duwan. Dadkiibuu salaamay, waxanu ku soo biiray fadhigii. Dabcan waana loo sii sheegay cidda u baahan.

MAXAMED-AMIIN: Saaxiib, aniga ayaa kuu yeedhay. Waxaanan rabaa in aan ku waydiiyo su´aalo la xidhiidha dhaqaalaha, si fahanka warka aan sheegi doonaa ugu sahlanaado dadka.

DHAQAALE-YAHANKII: soo daa su´aashaada !

MAXAMED-AMIIN: Dadkan waxa aad u sharraxdaa, waxa loo yaqaan *”lacagta la maydho”* ama *”lacagta la caddeeyo”* ee af carabiga lagu yidhaahdo ”Qasiilul-amwaal” ama ”tabyiidul-amwaal”.

DHAQAALE-YAHANKII: Haa, sax waaye. Af ingiriisigana waxa lagu magacaabaa *"Money-washing"* ama *"money-laundering"*. Waxa waaye, lacago asalkoodu xaaraan ahaa, sida in laga shaqaysto mukhadaraad ama la soo dhaco ama xatooyo xoolo dadweyne iwm oo loo suuq geliyo hab xalaal u eeg. Ugu yaraan saddex marxaladood ayaa maalkaas xaaraanta ah la marsiiyaa si uu u maydhmo oo raadkiisii u lumo. **Marka 1aad;** waxa lacagtaas la geliyaa suuqyada dhaqaalaha ee caadiga ah ama sharciga ah. **Marka 2aad,** waxa lacagtaas lagu war wareejiyaa akoonno iyo bangiyo kala duwan oo fara badan, si ay u adkaato in la ogaado asalkeedii xaaraanta ahaa. **Marxaladda 3aad,** waxa ay lacagtii si caadi ah u soo gelaysaa suuqa oo si furan ayaa loogu macaamilayaa. Inta badan dadka xoolahaas ku macaamilayaa ama lagu socodsiinayaa waa *"dhibanayaal aan dhaaddanayn".* Waxa laga yaabaa in qofkii laga dhacay ama lagu dhibayey maalkaas uu u dhidido dhawridiisa.

MAXAMED-AMIIN: Diktoor dhaqaaleyahan! waad mahadsantahay. Dadyahow, idinkana waxa aan idin leeyahay; ma fahanteen waxa looga jeedo lacagta la soo maydhay ama la soo caddeeyey?

DADKII: Haa… Haaa…. Haaaa… waanu fahannay…. Si wanaagsan ayaanu u fahannay!

MAXAMED-AMIIN: Haddaba, haddii aad fahanteen sida lacagta loo maydho, waxan idinku baraarujinayaa in siyaasadda laftigeedana la soo maydhi karo. Ujeedo; *fikrad asalkeedu shirqool ahaa, ayaa dadkii lagu shirqoolayey loogu eekaysiin karaa maslaxaddooda. Markaas ayey iyagu dhaqangelinteeda ka shaqayn karaan ayagoo u qaba in ay maslaxaddoodu ku jirto.*
Haddaba arrimaha siyaasadda umaddeena iyo qaar ka mid ah fatwooyinkan faraha ka batay, waa qaar asalkoodi ahaa sidaas aan kor ku xusay. Culimada fatwoonaysa iyo dadkeena masaakiinta ah ee lo fatwoonayo, labadeenuba waxa aynu nahay ***"dhibbanayaal aan dhaaddanayn***". Haddii aad i fahanteen, sidaas ayaan ugu magacaabay fatwooyinkan gaarka ah *"fatwooyin la soo caddeeyey*".

DADKII: Arintaasi khatar waaye! Ma kaa siisanayno in aad noo sheegto in culimadeena waxan ay ka hadlayaan, aanay kala ogeyn. Caddayn ayaa lagaa sugaa, Maxamed-amiinow.

MAXAMED-AMIIN: Bal horta is dejiya. Haddii aad rabtaan, warka caddayntiisa waan idinka dharginayaaye, markaa waa in aad ku talo gashaan wakhti dheer in aad fadhidaan.

DADKII: waa fadhiyeynaa! Looma kala kacayo manta ee caddaymahaaga soo dey! Fatwooyinkani intii aan la maydhin sidii ay u eegaayeen ayaa lagaa rabaa jaalle!

Maxamed-amiin waxa uu bilaabayaa in uu dadkii u daaro filin goosgoos ah. Marka uu qaybyar daawadsiiyo-ba wuu joojinayey filinka si uu faallo ugu darsado. Waxa muuqanaysay in uu filinka meel badhtanka ah ka bilaabay oo qaybo hore ay jireen. Sida soo socota ayuu ahaa filinku

MUUQAALKA 1AAD:
Taariikhdu waa 2007. Waxa filinka ka dhex muuqanaya niman khubaro ah oo madaxu wada bidaaraystay. Waxa ay ka tirsanyihiin, xarun cilmibaadhiseed oo arrimaha siyaasadda kala talisa dawladda Maraykanka. Waxa ay ka hadlayaan arrimaha caalamka islaamka, dagaalka

ay reer galbeedku ugu magac-dareen la dagaallanka argagixisada iyo arrimaha Soomaaliya oo labadaas hore farac u ah. Waxa ay aakhirka soo saarayaan talo aad loo lafa guray oo ku saabsan sidii dawladda Markaykanku ula dhaqmi lahayd mawduucyada kor ku xusan. Taladaas nuxurkeedu wuxu ahaa:

- Dawladda Maraykanku waa ay ku fashilantay dagaalkii argagixiso la dirirka ee waa in ay wax ka bedeshaa.
- Dagaalka Soomaaliya ka socda, waxa ay bilowgii noola muuqatay in ay xulafadeenu ku guulaysteen, laakiin sida ay wax u socdaan, waxa ay guushu u socotaa dhinaca mujaahidiinta mayalka adag. Haddii ay nimankaasi la hoydaan guushaas, waxa ay geeska afrika oo dhan kula wareegayaan si sahlan. Markaa waa in hadda laga hor tago tab iyo xeelad cusub oo ***"guushooda u rogta guuldarro"***
- Waa in la badbaadiyo sharafta xulafadeena Itoobiya oo si xeeladaysan looga saaro Soomaaliya, si ay u sii lahaato samaynteeda
- Waa in islaamiyiinta loo kala sooco, qaar qunyar socod ah oo beesha caalamka la jaanqaadi kara iyo qaar aan islaamka waxba uga sokeyn. Kuwa hore aan soo dhaweysanno kuwa dambena sii wadno dagaalkooda
- Islaamiyiinta qunyar socodka ah aynu wax uga ogolaanno siyaasadahooda, innaga oo shardi uga dhigayna in ay wakiil inooga noqdaan la dagaallanka argagixisada (*lafo geri iyagaa la isku jebiyaa)*
- Markaa ha la taageero dawlad ay ku midoobaan, islaamiyiinta qunyar socodka ah, qabaa´isha, cilmaaniyiinta, qurba joogga, ururada bulshada iyo haweenka.

MUUQAALKA 2AAD:

Taariikhdu waa isla 2007. Waxa muuqanaya dawladda Maraykanka oo ka baaraandegaysa sidii ay uga midho dhalin lahaayeen talooyinkaas ay soo jeediyeen khubaradoodu. Waxa la arkayaa Guriga-cad oo la shiraya; *barafasoorrada siyaasadda, dawladda talyaaniga, dawladda Ingiriiska, wakiilada midowga Yurub, Moral rearment, Bilderberg group, khubarada UN:ta, NGO-yada, kooxaha danaha Yuhuudda iyo aqoonyahanno Soomaaliyeed*. Muddo yar ka bacdi waxa u caddaanaya jidkii ay ku hirgelin lahaayeen talooyinkaas. Saddex jiho in arkinka laga galo ayaa u muuqday. Laakiin waa in aan la fahmin sida ay isugu xidhanyihiin. Xiitaa kuwa shaqada qabanayaa waa in aanay is garan.

- Un:ta, NGO:yada, qurbajoogta Soomaalida iyo diblomaasiyiinta reer galbeedka, waxa lagu aaddinayaa hogaamiyeyaasha lagu sahansaday qunyar socodnimo ee ka tirsan kacdoonka shacabka. Waxa loo sheegayaa in dhibaatooyinka iyo mashaqada dadkiina haysata wax laga qaban karo haddii aad wada-shaqayn ogoshihiin. Idinka la idinma diidana. Idinku rag macquul ah ayaa tihiin, ayaaha wadankiinana waa la idinkala tashan karaa. Laakiin waa in aad dhinac isaga saartaan nimanka ah mujaahidiinta fogaaday !
- Dawladaha carabta ee siyaasadaha Soomaaliya wax ka yaqaan, sida Masar iyo Liibiya waxa loo dirayaa in ay ka raaridaan madaxda maxkamadaha ee debedyaalka ah in ay suurtagal tahay xallinta musiibada Soomaaliya, haddii la is furfuro oo siyaasadaha laala jaanqaado.
- Dhinaca boqorrada khaliijka, waxa loo bandhigayaa kaadh culus oo digniin xambaarsan. Waxa lagu odhanayaan; Soomaaliya dagaal weyn ayaa ka socda. Nimanka Mujaahidiinta ahi haddii ay qabsadaan halkaa, cidda ugu horraysa ee ay galaafan doonaan waa idinka. Dhalinyaradiinu xaggaas ayey u dareeri doonaan sida

ayax harraada, dabadeedna way idinkaga soo duuli doonaan. Haddaba waxa aanu idiin sheegaynaa in aanu ogolnahay in ay Soomaaliya nabadi ka dhacdo, intaas aad diinta kaga dhaqantaanna lagaga dhaqmi karo. Laakiin waxa shardi ah in marka hore ay meesha ka baxaan nimanka mujaahidiinta fogaaday ahi. Waan idiin fasaxnay wixii aad Soomaaliya ka qabanaysaan ee arinkaas waafaqaya

JOOJIN FILIN <>

MAXAMED-AMIIN: Arinkaas loo soo bandhigay madaxdii kacdoonka ee ah in loo kala qaybiyo qaar macquul ah iyo qaar aan macquul ahayn, waa mid soo jireen ah oo dhammaan Nebiyadii Alle loo soo bandhigay. Laakiin Nabiyadii Alle waa ay ku gacan-saydhi jireen sida Quraanka ku dhigan.

SII WADDID FILIN>

MUUQAALKA 3AAD

Waxa muuqanaya dadyaw kala muqaallo geddisan oo leh kala duwan isla markaana gashan maryo aan shaqo isku lahayn. Soomaali, carab, sheekhyo, Maraykan, Caddaan kale iyo afrikaan ayaa is waydaaranaya. Waxa la dhaqaajiyey umado aan is ogayn oo hal erey ku wada hadaaqaya; ***"dhibaatada soomaaliya waa in xal loo helaa"…. "dhibaatada soomaaliya waa in xal loo helaa"…. "dhibaatada soomaaliya waa in xal loo helaa".*** Boorsooyin madmadoow, shirar kala duwan, hoteello waaweyn iyo dayaarado is dhaafaya ayaa muuqanaya.

MUUQAALKA 4AAD

Haddeer arrimihi hoos ayey u soo daadegeen. Muuqaalkani waxa uu muujinayaa

- Qolyihiin kacdoonka shacabka hoggaaminayey ee debedyaalka noqday, waxa gashay rajo ah in loo soo dabcay. "Nin aan warankaagu gelin weedhaadu ma gasho, ayaa la yidhi. Allaylehe warenkeenii ayaa inoo soo dabciyey" ayey isugu sheekaynayaan. Waxay u furfurnaadeen kulamada diblumaasiyadeed
- Boqorradii carabtu waxa ay dhegaha culimadooda ugu rideen war rajo leh. Waxa ay xasuusiyeen dhibaatada haysata shacabka la walaalka ah ee marna carabta ah marna muslinka ah!!!!!. Waxa ay u sheegeen in ay culimadu doorkeeda qaadato oo ay adeegsadaan culimadii Soomaaliyeed ee ay waddamada khaliijku ku tabceen ee ay maalgeliyeen waxbarashadooda ee ay dacwadda darteed u gunneeyeen. Halkaas ayey culimadaasina ka hawlgaleen ayagoo arinku lillaahi ka yahay. Waxa ay dhaqdhaqaaq nololeed geliyeen, culimadii xisaabtooda ka tirsanayd ee Soomaaliyeed. Dabcan silsiladdaas culimada ahi waa ay fahansanyihiin, khadadka cagaarani meelaha ay maraan ee aan la dhaafi karin.
- Qolyihii ka kala socday dublamaasiyiinta reer galbeedka, NGO:yada UN-ka, carabtii kale, afrikaankii, dhammaantood ayaga oo huwan magaca beesha caalamka waxa ay isu waydaarteen madaxdii debedyaalka ahayd ee kacdoonka. Markan waxa loo jilciyey qorshihii uu ku dhaboobi lahaa kala bixitaanka iyaga iyo mujaahidiinta fogaaday isla markaana aanay eeddaynta shacabku iyaga ugu dhici lahayn. Waxa loo sheegay in la dhiso urur waddani ah halkii markii hore ay ka ahaayeen islaamiyiin. Ururkaas waxa ka mid noqon karaya dhammaan soomaalida kooda islaamiga ah iyo kooda aan islaamiga ahaynba. Ujeedada dagaalka iyo magaciisana waxa ay ka

dhigayaan xoraynta dalka, halkii uu markii hore ka ahaa jihaad Ilahayd dartii ah. Waxa lagu yidhi; haddii aad sidaas yeeshaan waxa la idiin aqoonsan doonaa mucaarad sharci ah, qaddiyaddiinuna hiil ayey heli doontaa. Dhinaca kale waxa si sahlan idiinka hadhi doona mujaahidiinta mayalka adag ee aanay islaamnimada waxba uuga sokeyn, waxbana uuga dambeyn. Qorshahaas waa ay aqbaleen, waxaanay noqdeen ururwaddani ah oo gobanimo u dirir ah oo Itoobiya oo keli ah cadow u arka oo xiitaa ogol ciidamo shisheeye oo aan Itoobiyaan ahayn.

JOOJIN FILIN <>

MAXAMED-AMIIN: Halkan sir ayaa ku jirta. Waxa mushkiladda oo dhan lagu soo koobay, Ciidamada Itoobiya. Waxa meesha laga saaray ciidamada kale ee shisheeye ee markaa joogay ama dib ka iman kara. Waxa meesha laga saaray kooxdii ciidamda Itoobiya jidka soo tustay ee u kaalmaysay. Xasuuso qodobadii talabixinta ahaa ee xarunta cilmi-baadhista ee ay ku jireen; in dawlad isku dhaf ah la dhiso, in Itoobiya si sharaf leh loo badbaadiyo iyo in Mujaahidiinta fogaaday lala diriro. Haddii Itoobiya baxdo, cidda dirirtaas wadaysaa waa ciidamada shisheeye eh garo. **Markaa fahma xidhiidhka ka dhexeeya** fatwooyinka aakhirataanka soo bixi doona ee ku saabsan taageerada dawladda isku dhafka ah, ciidamada shisheeye nabadgelintooda iyo jid u bannaynya Itoobiya!!!

dhiibidda kuwii lala dagaallamayey ee ahaa beesha caalamka, iyo aqoonshada distoorkii ay beesha caalamku hore u soo dejisay iyo wax la qaybsiga kooxdii ay la dirirayeen.

MUUQAALKA 7AAD:
Muuqaalkani waxa uu muujinayaa ururkii waddaniga ahaa ee debedda ku kala jabay oo ay taageerayaashoodii guduhuna kala jabeen. Gudihii oo ay ku isku ballaadhatay kooxdii markii hore la islahaa takoora. Culimadii aan hore ula xidhnayn ururkan debedda ee kala jabay iyo mujaahidiintan gudaha ee batay laakiin ay silsiladi ugu xidhantahay culimada khaliijka carbeed ayaa dhinac ka soo faafay. Kooxdii ururka waddaniga ah ka mid ahayd ee beesha caalamku wax u ogolaatay iyo culimadaas labadoodaba waxa ka muuqday degdeg. Waxa aad mooddaa in ay joojin rabaan gaadhi xawli ku socda oo aanay rabin in ay la hadlaan darawalkiisa. Qolada sheeganaysa in ay beesha caalamku kala shaqaynayso danta umadda Soomaaliyeed waxa ay u degdegayeen in ay ku biiraan dawladdii ay hore ula dirirayeen. Degdeg….. degdeg… degdeg…. Qolada culimada ahin waxa ay u degdegayeen in ay hakiyaan mawjado xawli ku socda, si ay dawladdaasi meel u hesho. Waxa ay sida dhagxaanta u soo daayeen fatwooyin ay ka mid ahaayeen:

- ”Dadka in la iska gaalaysiiyo ma aha. Taasi waa dhaqankii khawaarijta”: Guddiga culimada
- ”Gobollada ay ka jiraan maamullada ay dadka deegaanku doorteen, waa xaaraan in la qabsado”: Guddiga culimada
- ”Ciidamada Soo duulay lama weerari karo, maadama ay sii baxayaan”: guddiga culimada
- “Waa waajib diini ah in dawladda la taageero”: Guddiga culimada
- “Dawladdu distoorka ha ku waafajiso diinta islaamka muddo 90 cisho ah”: guddiga culimada iyo culimo shirtay
- “Ciidamada gaalada ah ee dalka jooga, ha lagaga bixiyo dalka muddo 120 cisho ah, kuwo kalena yaanan la keenin”: Guddiga culimada iyo culimo shirtay.

JOOJIN FILIN <*>

MAXAMED-AMIIN: Marka aad fiiriso fatwooyinkaas, isla markaana aad dib u eegto go´aamadii xarunta cilmi-baadhista maraykanka ah, waxa kuu caddaanaya in ay fatwooyinkani saacidayaan talo bixintaas aadka looga soo shaqeeyey. Ujeedo; arin asalkeedii ahayd fikrad shirqool ah, marka ay soo marto dhawr wareeg ayey dadkii lagu shirqoolayey qaarkood u qaadanayaan maslaxadoodii oo soo dhawaatay, markaa ayey xiitaa culimadooda qaarkood fatwooyin ku taageerayaan. Waa sidii lacagtii la soo caddaynayey oo kale. Qofka ka fatwoonaya arrimaha siyaasaddana waa in uu marka hore helaa cilmi baadhis dhexdhexaad ah, haddii kale afkiisa ha haysto.

Markii ay dadkii maqleen sharrixii ”fatwada la soo caddeeyey” ayey fahmen in ay dhammantood yihiin ”dhibbaneyaal aan dhaaddanyn”.

Maxamed Xirsi Guuleed
abdibashir@hotmail.com
2009-03-06